

Warqadda la soo raaciyo - Ugu yeerid baaritaan caafimaad

Waxaan kuu qornay ballan baaritaan caafimaad oo ay sameynayso kalkaaliso caafimaad. Fadlan eeg warqadda kale si aad u aragto waqtiga iyo goobta. Waxaa laguugu soo diray wargelintan maadaama aad tahay qof dhowaan yimid Iswiidhan.

Ujeeddada baaritaanka caafimaadka waa in si guud loo eego xaaladdaada caafimaad si aan kuu caawinno inaad caafimaad qabto intii suurtagal ah. Baaritaanka caafimaadka wuxuu ka kooban yahay wadahadal ku saabsan caafimaadkaaga iyo qaadista baaritaanno. Looma baahna inaad cuntada ka soonto(baaritaanka ka hor). Waxaa kuu ballansan turjubaan ku hadla luuqaddaada. Turjubaanku waxaa saaran waajibka sir-xafididda.

Baaritaanka caafimaadka waa dalab ikhtiyaari ah, waxaana adiga doorasho kuu ah inaad ka qayb qaadata. Baaritaanka caafimaadka waa bilaash oo wuxuu qaadanayaa qiyaastii saacad. Haddii aadan awoodin ama aadan rabin inaad ka soo qayb gasho, fadlan dib u ballan samee ama ballanta jooji.

Natiijada baaritaanka caafimaadka ma saameyn doonto fursaddaada ah inaad ku sii noolaato Iswiidhan. Hey'adda laanta Socdaalka ma heli doonto natiijada baaritaanka oo ma ogaaneyso.

Waxyaabaha hore loo soo qaato booqashada (haddii aad haysato): Kaarka Aqoonsiga, Kaarka LMA (aqoonsiga dadka aan sharci laheyn), Baasaboor, ama kaarka shatiga degganaanshaha. Haddii aad haysato dukumentiyada tilmaamaya talaalladii hore, fadlan keenso.

Magaca kalkaalisada aad la kulmaysid, waqtiga iyo taariikhda ballanta waxaad ka heleysaa warqadda kale. Waxaad sidoo kale halkaa ka arki kartaa cinwaanka iyo lambarka taleefoonka ee xarunta caafimaadka.

Soo dhawow!